

Washington Apple Health

Xuquuqaha Maamulka Dhagaysiga iyo Wakhtiyada kamadambaysta ah

Washington Apple Health Administrative Hearing Rights and Deadlines

Adiga waxaad xaq u leedahay maamul dhagaysi hadii aadan nagu raacsanayn qaraarkeena kaas oo diidey, dhameeyay, ama bedelay ceymis kujiridaada Washington Apple Health.

- Waxaad haysataa 90 maalmood laga bilaabo taariikhda kuqoran dusha ogaysiiskaan si aad ugu codsato dhagaysi. Haddii aadan dhagaysi kucodsan gudaha 90 maalmood, waxaa dhici karta in aad weyso xaqda aad u leedahay dhagaysi.
- Haddii aad doonaysid in aad sii wadatid ceymis kujiridaada inta lagu guda jiro hawsha dhagaysiga, **kafiiri ceymis kujirida socotey inta lagu guda jirey hawsha maamulka dhagaysiga** hoos.
- Adiga waxaad muraajaco kusamayn kartaa sharciyada dhagaysiga kujira Xeerka Maamulka Washington (WAC) cutubka 182-526.
- Waxaa dhici karta in aadan yeelan xaq dhagaysi ah hadii ceymis kujiridaada ladiido, dhammaato, ama isbedesho sababtoo ah qaanuunka gobolka ama dowlada wuu isbedelayaa wuxuuna isla markiiba isku si saameyn ugu yeelanayaa dhammaan dadka kuqoran barnaamijka (RCW 74.09.741(3)).
- Haddii aad qabtid baahi daryeel caafimaad deg-deg ah, waxaad codsan kartaa dhagaysi la dedejiyay waana in aad keentid daliilka caafimaadka ee baahida. Qaaliga ayaa go'aansan doona haddii aad yeelanaysid dhagaysi la dedejiyay iyo haddii kale oo aadan yeelanaynin. Waxaa dhici karta in aadan qaadanin dhagaysi la dedejiyay haddii aad qaadatid ceymis kujirid socota.

Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha (CLEAR) ayaa dhici karta in uu kugu caawiyo helida caawimaad lacag la'aan oo sharci ah haddii aad tahay qof dakhligiisu yar-yahay. Waxaad kacodsan kartaa boggaan internatka ah <http://nwjustice.org/clear-online>, ama:

- Haddii aad tahay qof kahooseeya da'ada 60 sanno, kawac Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha (CLEAR) lambarkaan 1-888-201-1014.
- Haddii aad tahay qof da'adiisu tahay 60 ama kaweyn, kawac Madaxa Iskuduwaha Tallada Waxbarashada Sharciga ah iyo Wareejiyaha lambarkaan 1-888-387-7111.

Ceymis kujirida socota inta lagu guda jiro hawsha maamulka dhagaysiga

- Waxaad awoodaa in aad haysatid ceymis kujiridaada inta lagu guda jiro hawsha dhagaysiga. haddii ogaysiiskaaga sheegayo in aynu joojin doono, dhamayn doono ama yarayn doono ceymis kujiridaada Washington Apple Health ama adeegaha hore loo oggolaaday.,
- Si aad u hesho ceymis kujiridaada, waxa khasab kugu ah in aad dhagaysi kuweydiisato kahor maalinta 10^{aad} ee kadib marka aynu kuu soo dirno oggaysiiska tallaabada ama maalinta u dambaysa ee bisha kahor inta aan tallaabadu dhaqan gelin.
- Haddii aad hesho ceymis kujirid soconaysa ama adeegaha kadibna weyso dhagaysigaada, waxa dhici karta in ay khasab kugu noqoto in aad bixiso ayidaad lagu ayidayo 60 maalmood oo kamid ah ceymis kujirida socotay ama adeegaha (fiiri WAC 182-504-0130).
- Ma awoodid in aad heshid ceymis kujirid marka aad sugayso dhagaysi si aad u waajahdo diidista codsigaada Washington Apple Health.

Codsashada maamulid dhagaysi

Si loo codsado maamul dhagaysi, ama hadii aad doonaysid tarjumaan ama caawimaad kale si aad u codsato dhagaysi, samee mid kamid ah waxyaabahaan soo socda:

- Ka wac Xafiiska Adeegaha Bulshada ee xarunta adeega macamiilka lambarkan 1-877-501-2233 ama wac Gurigaada degaanka iyo xafiiska Adeega Bulshada (HCS).
- Ka wac Qaybta LTC-da Gaarka ah lambarkan 1-855-873-0642 ama wac xafiiskaada Maamulka Horumarinta Naafuoyinka gudaha (DDA)
- Qor warqad ama buuxi foomka Codsashada Maamulka Dhagaysiga HCA 12-507 (taas oo laga helo boggaan internatka ah www.hca.wa.gov/apple-health-client-forms) iyo:
Faakis ugu dir dhinaca 1-888-338-7410; AMA

Boosto u dir dhinaca: CSD Customer Service Center PO Box 11699 Tacoma, WA 98411-6699

Haddii aadan garanaynin sida loola xiriiro, wac lambarka ku qoran bogga koobaad ee warqadan. Anaga waxaan muraajaco kusamayn doonaa dacwadaada ama xaaladaada kadibna waxaan isku dayi doonaa in aynu xalino mowduuca kahor dhagaysiga maxkamada.